

Luuqadaha kale: ku iskaan garee koodhka QR-ka taleefonkaaga casriga ah.

www.vd.ch/orientation  
► qeybta *Publications*



Lausanne, Maarso 2024

Waalidiinta qaaliga ahaaw,

Xagaaga xiga, ilmahaagu waxa uu ka bixi doonaa dugsiiga uu hadda dhigto oo waxa laga yaabaa in uu ka qeyb galo xirfad barasho, barto dugsi sare ama sannad buundo kor u qaadid ah. The Office Cantonal d'Orientation Scolaire et Professionnelle (Xarunta Waxbarashada iyo Hagitaanka Farsamada Gacanta ee Qeyb-hoosaadka Wadanka) (OCOSP) ayaa halkan kuu joogta waqtigan muhiimka ah. Gudaha warqadan, waxaan ku soo bandhignay laba siyaabood oo aan caawinaad ku bixin karno: annagoo awood kuu siineyno inaad hesho macluumaad iyo habka adeegga la talinta xirfadaha.

**1. Ma jeceshahay inaad ku taageerto ilmahaaga xirfaddiisa/deeda mustaqbalka?**

Waxaad ku caawin kartaa ilmahaaga adoo booqanaya websaydkeena:

[www.vd.ch/orientation](http://www.vd.ch/orientation)

► qeybta ***Pour les élèves de la scolarité obligatoire***



Websaydka waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan:

- shaqooyinka, xulashooyinka waxbarasho iyo tababarka xirfadaha;
- helida meeeyn iyo sida habku uu u shaqeeyo;
- sida loo aqoonsado xirfad barasho.

**2. Miyaa dooneysaa inaad khabiir kala hadasho xirfada mustaqbaleed ee ilmahaaga?**

Adiga iyo ilmahaagu waxaad u iman kartaan inaad wada-hadal la yeelatan la-taliyaha xirfadaha ee dugsiiga si aad:

- Aqoonsato waxa uu xiiseenayo, qiyamka, xirfadaha iyo meelaha uu ku wanaagsan yahay ilmahaaga, oo aadna kula xidhiidhin doonto fursadaha doorashada waxbarasho;
- Ugu fidiso ilmahaaga taageero shaqsiyeed si uu uga gaaro bilaw guul leh xirfadiisa/deeda (taageerada ku aadan aqoonsashada shirkadaha, qoritaanka codsi, u diyaargarowga imtixaanada qaabillitaanka iwm.);
- Uga shaqeyso dhibaatooyinka iyo caqabadaha ilmahaagu kala kulmi karo xirfaddiisa/deeda mustaqbalka.

Waan ku faraxsanaan doonaa inaan ku siino macluumaad kasta oo dheeraad ah oo aad u baahan karto.

Mahadsanidiin,

Alexandra Petrovitch

Agaasimaha